



## Puget Sound Regional Council

### **Guddiga La-talinta Sinnaanta (EAC)**

### **Shaacinta Qabashada Codsiyada**

#### **Ujeedo**

Badhtamaha gobolka Puget Sound wuxuu leeyahay taariikh dheer oo cunsuriyad ah oo wali sii sababaysa waxyeelo weyn. Ka wakaalad qorshayn ahaan, Golaha Deegaanka ee Puget Sound (Puget Sound Regional Council, PSRC) waxay gaadhaan go'aamo qaabeeya gaadiidka, awood u lahaanshaha guryaha iyo horumarka dhaqaalaha. Sidaas darteed, hay'adda waxaa saaran mas'uuliyad ah inay kala furfurto nidaamyada sinaan la'aanta iyo dib-uga-fikiridda gobol aan tayada nolosha qofka lagu qiimayn qoomiyaddiisa. Hay'addu way aqoonsan tahay mas'uuliyaddan waxayna samaysay Guddiga La-talinta Sinnaanta si ay u wada-abuuraan alaabooyinka (sida agabyada xogta iyo khayraadka qorsheynta) shaqaalaha iyo Maamulka Sare. Guddigu wuxuu talo ka siinayaa guddiyada PSRC iyo maamulka siyaasadda wixii ku saabsan siyaasadaha iyo barnaamijyada leh indhaha sinnaanta.

#### **Muhiimadda**

Gobolka dadkiisu way sii kala duwanaanaan. Si kastaba ha noqotee, go'aan qaadayaasha hadda jira ee saraakiisha la soo doortay iyo shaqaalaha gobolka ee ka shaqeeya maamulada iyo guddiyada PSRC iyo shaqaalaha hay'adda ee ay shaqaaleeyaan PSRC hadda ma muujinayaan kala duwanaanshaha gobolka. Sidaa awgeed, sida wakaalado kale oo badan, PSRC waxay leedahay meelo la ilduufi karo oo u horseedi kara in faquuqa lagu sii wado bulshooyinka Madow, Dadka dhaladka ah, iyo dadka midabka leh (BIPOC) iyo cawaaqibiyada aan laga fiirsan ee ku keeni kara waxyeelo dheeri ah. Guddigan wuxuu abuuri doonaa meel ay bulshada kala shaqeyn karaan shaqaalaha PSRC iyo saraakiisha la soo doortay ee gobolka oo dhan si meesha looga saaro caqabadaha, looga faa'iideysto dhalashada buuxda ee bulshada BIPOC, lagana horumaro gobol ahaan dhinacyo badan.

#### **Waajibaadka Xubnaha Gudiga La-talinta Sinnaanta**

- La shaqaynta xubnaha kale ee EAC iyo shaqaalaha PSRC si ay u fuliyaan Istaraatiijiyadda Sinaanta ee Gobollada
- Kala talinta maamulka iyo guddiyada PSRC wixii ku saabsan siyaasadaha iyo barnaamijyada leh indhaha sinnaanta
- Kala shaqaynta shaqaalaha PSRC si loo wanaajiyo la shaqeynta dadka Madow, Dadka Dhaladka ah, iyo dadka midabka leh (BIPOC) iyo bulshooyinka kale ee la haybsooco taas oo qaabayn doonta siyaasadaha, wax soo saarka iyo qorshooyinka
- Si firfircoon uga qaybgalka shirarka, wadaagista khibradaha goobjoognimo ee gaarka ah, aragtiyada iyo khibrada

- Ku bixinta ugu yaraan laba saacadood diyaarinta iyo bixinta dabagalka kulan kasta (sida dib u eegista qalabka, la socodsiinta xubnaha bulshada iyo / ama asxaabta haddii loogu baahdo, la xiriir shaqaalaha PSRC)

### **Kulamada**

Kulamada EAC waxay qabsoomaan Khamiista koowaad ee bil kasta laga bilaabo 5:30-7:30 GD. Hadda kulamada waxa loo qabtaa si onlayn ah, laakiin waxa loo wareejin karaa qaab isku-jir ah mustaqbalka. Iyadoo ay ku xiran tahay culeyska shaqada ee guddiga, shirarka billaha ah waa la joojin karaa ama shirar dheeri ah ayaa lagu dari doonaa. Xubnaha waxaa lagu abaalmarin doonaa waqtigooda haddii aanu horeyba loo shaqeeyahoodu ugu abaalmarin kaqaybgalkooda (guji [halkan](#) si aad wax badan uga ogaato siyaasaddayada abaalmarinta).

### **Nidaamka Xulista**

Musharrixiinta xiiseynaya inay ka mid noqdaan Guddiga La-talinta Sinnaanta waa inay soo gudbiyaan codsi khadka tooska ah ka hor **Sebtembar 18, 2023**. Intaa waxaa sii dheer, musharrixiinta waxaa laga codsanayaa inay keenaan illaa laba tixraac oo ka hadli kara aqoonta musharraxa, isku xirnaanta bulshada iyo u heellanaanta sinnaanta qoomiyadaha. Musharrixiinta loo xushay inay hore ugu socdaan ayaa laga codsan doonaa inay ka qayb galaan wareysi. Koox ka kooban xubnaha guddiga iyo shaqaalaha PSRC ayaa dib-u-eegis ku sameyn doona codsiyada iyo wareysiyada lala yeelanayo.

Codsadeyaasha su'aalaha qaba waa inay la xiriiraan Charles Patton oo ah [cpatton@psrc.org](mailto:cpatton@psrc.org).